DASTUURKA XISBIGA TIIR

CONSTITUTION OF TIIR PARTY

TACLIIN • TASHI • TACAB

Xisbiga Cadaaladda iyo Midnimadda "TIIR" waa xisbi siyaasadeed, wadani ah mabaadi'diisuna ku qotonta shareecada islaamka, dhaqanka , anshaxa suuban ee soomaaliyeed iyo heer-tusaaleedka caalamiga ah.

Contact Information : Website: www.xisbigatiir.so | Twitter: @Xisbigatiir | Email: Info@xisbigatiir.so or xisbigatiir.so@gmail.com| www.Facebook.com/XisbigatiirSom or www.Youtube.com/xisbigatiir | Tel: 002526-13194074, Office: 642659

XEERKA XISBIGA CADAALADDA IYO MIDNIMADDA

TUSMADA DASTUURKA

BAYAANKI KOOWAAD

HORDHACA XEERKA XISBIGA CADAALADDA& MIDNIMADDA

CUTUBKA KOOBAAD

1 - QODOBKA 1AAD TILMAAMAHA XISBIGA /SIFADDA IYO DABEECADA XISBIGA……

2 - QODOBKA 2AAD MAGACA XISBIGA ……..

3 - QODOBKA 3AAD CALANKA XISBIGA ……..

4 - QODOBKA 4AAD ASTAANTA XISBIGA ……..

5 - QODOBKA5AAD XARUNTA DHEXE EE XISBIGA……..

6- QODOBKA6AAD SHARCIYADDA XISBIGA ……..

7 - QODOBKA 7AAD LUQADDA RASMIGA AH EE XISBIGA ……..

CUTUBKA LABAAD

HIMILADDA IYO HIIGSIGA XISBIGA

8 -QODOBKA 8AAD UJEEDOOYINKA IYO YOOLKA XISBIGA…….

9 - QODOBKA 9AAD HIMILADDA XISBIGA iyo HIIGSIGA XISBIGA……

10 -QODOBKA 10AAD MABAADII'DA GUUD EE XISBIGA……..

11 - QODOBKA 11AAD BARNAAMIJKA SIYAASADEED EE XISBIGA……..

CUTUBKA SEDAXAAD

KAMID NOQOSHA IYO XUBINIMADA XISBIGA

12 - QODOBKA 12AAD SHURUUDAHA KU BIIRISTA XISBIGA ……..

13 - QODOBKA 13AAD XUQUUQDA XUBNAHA KU BIIRAYA XISBIGA……..

14 - QODOBKA 14AAD HELITAANKA XUBINIMADA XISBIGA ……..

15 -QODOBKA 15AAD XUBIN KANOQOSHADA GOLAYAASHA XISBIGA ……..

16 -QODOBKA 16AAD XUQUUQDA XUBNAHA BUUXA EE XISBIGA ……

17 - QODOBKA 17AAD OGOLAANSHAHA XUBINIMADA ……

18 -QODOBKA 18AAD WAAJIBAADKA GUUD EE XUBNAHA XISBIGA ……

19 -QODOBKA 19AAD WAAYIDDA XUBINIMADA ……

CUTUBKA AFARAAD

HAYKALKA IYO QAAB-DHISMEEDKA XISBIGA

20- QODOBKA 20AAD QAAB DHISMEEDKA XISBIGA……..

21- QODOBKA 21AAD HEERKA DHEXE EE XISBIGA ……..

22- QODOBKA 22AAD SHIRWEYNAHA GUUD EE XISBIGA ……..

23- QODOBKA 23AAD SHIRWEYNAHA CAADIGA AH EE XISBIGA ……..

24- QODOBKA 24AAD SHIRWEYNE AAN CAADI AHAYN ……

25- QODOBKA 25AAD HABKA IYO AJANDAHA SHIRWEYNAHA GUUD EE XISBIGA ……

26- QODOBKA 26AAD XILKA IYO WAAJIBAADKA SHIRWEYNAHA ……..

27- QODOBKA 27AAD GOLAHA DHEXE ……

28- QODOBKA 28AAD SHURUUDA XUBINIMADA GOLAHA DHEXE ……..

29- QODOBKA 29AAD GUDOONKA, XAFIISKA GOLAHA DHEXE IYO GUDDIGA JOOGTADA AH EE GOLAHA ……..

30- QODOBKA 30AAD HOWLAHA GOLAHA DHEXE EE XISBIGA ……..

31- QODOBKA 31AAD FADHIYADA GOLAHA DHEXE ……..

32- QODOBKA 32AAD GOLAHA FULINTA IYO FADHIYADA GOLAHA FULINTA ……

33- QODOBKA 33AAD WAAJIBAADKA & XUQUQDA XUBNAHA GOLAHA FULINTA ……..

34- QODOBKA 34AAD QAAB DHISMEEDKA IYO XILALKA XUBNAHA GOLAHA FULINTA XISBIGA A) QAAB DHISMEEDKA XISBIGA B) XILALKA XUBNAHA GOLAHA FULINTA …

35- QODOBKA 35AAD GUDDOOMIYAHA XISBIGA ……..

36- QODOBKA 36AAD SHURUUDAHA DOORASHADA GUDOOMIYANIMADA XISBIGA …

37- QODOBKA 37AAD DOORASHADA GUDOOMIYAHA XISBIGA ……

38- QODOBKA 38AAD WAAJIBAADKA GUDOOMIYAHA ……..

39- QODOBKA 39AAD BANAANANTA JAGADA GUDOOMIYINIMADA ……..

40- QODOBKA 40AAD GUDOOMIYE KU-XIGEENADA XISBIGA ……

41- QODOBKA 41AAD XOGHAYAHA GUUD IYO KU-XIGEENAKIISA ……

CUTUBKA SHANAAD

MAAREYNTA HANTIDA XISBIGA

42- QODOBKA 42AAD HABKA MAAMULKA IYO MAAREYNTA HANTIDA XISBIGA……..

CUTUBKA LIXAAD

SHAQAALAHA IYO HOWLWADEENADA

43- QODOBKA 43AAD XAFIISKA SHAQAALAHA IYO HAWLWADEENADA XISBIGA ……..

44- QODOBKA 44AAD XOGTA & SHURUUDAHA SHAQAALEYNTA ……..

45- QODOBKA 45AAD SARAAKIISHA IDMAN ……..

46- QODOBKA 46AAD BANAANAANTA XAFIISYADA IDMAN EE XISBIGA ……..

47- QODOBKA 47AAD DOCUMENTIYADA SIYAASADEED EE UU XISBIGU SOO SAARO……..

CUTUBKA TODOBAAD

HABRAACYADA DASTUURKA

48- QODOBKA 48AAD HABRAACA WAX KA BADELKA MAGACA IYO DASTUURKA XISBIGA IYO XISBIGU SOO SAARO ……..

49- QODOBKA 49AAD HABRAACA KU BIIRIDA XISBI KALE ……..

50- QODOBKA 50AAD HABKA XALINTA QILAAFAADKA XISBIGA GUDAHIISA ……..

51- QODOBKA 51AAD HIR GELINTA QIYAMKA DADKA SOOMAALIYEED IYO MABAADII'DA MAAMUL WANAAG……..

52- QODOBKA 52AAD DOORKA HAWEYNKA IYO DADKA LAGA TIRADA BADANYAHAY …

CUTUBKA SIDEEDAAD

HEERARAKA ANSHAXA DASTUURKA

53- QODOBKA 53AAD GUDDIGA ANSHAXA……

54- QODOBKA 54AAD FALALKA IYO HABRAACA ANSHAX IYO SHURUUDHA KALA DUWAN EE ANSHAX MARINTA ……..

55- QODOBKA 55AAD A) MAAREYNTA (B) RACFAAN……..

CUTUBKA SAGAALAAD

56- QODOBKA 56AAD HEER GOBOL IYO DEGMO

57- QODOBKA 57AAD LAAMAHA DIBADDA EE XISBIGA

CUTUBKA TOBNAAD

58- QODOBKA 58AAD XEERARKA GUUD IYO HABRAACA WAXKABEDELKA IYO KAABISTA XEERKA XISBIGA ……..

59- QODOBKA 59AAD BAABI'INTA XISBIGA AMA MID KA MID AH LAAMIHIISA ……..

60- QODOBKA 60AAD FASIRAADA XEERKA XISBIGA ……..

61- QODOBKA 61AAD XEER-HOOSAAD ……..

62- QODOBKA 62AAD DHAQANGALKA XEERKA ……..

HORDHACA XEERKA XISBIGA CADAALADDA& MIDNIMADDA

Shirar is daba joog ah oo ku qabsoomay meelo kala duwan, wada tashiyo qoto dheer, gorfeyn iyo falanqeyn socotay mudo saddex sanno ah kuwaas ay lahaayeen aqoonyahano, Siyaasiyiin, indheer-garad, Culima-awdiin, Haween, Dhalinyaro iyo Waxgaradka kala duwan oo ka socday dhammaan umadda Soomaaliyeed loogana arrinsanayay aasaaska xisbi siyaasadeed ku dhisan xoriyad iyo Cadaalad oo ay ku mideeysanyihiin dhammaan Bulshada Soomaaliyeed.

Doodahaas iyo falanqayntaas dheer kadib waxaa laysla gartay in la yagleelo Xisbi horseedi karo midnimo, cadaalad, sinaan, xoojiyana wadajir umada soomaaliyeed iyo nabad kuwada noolashahooda oo ku dhisan mabaadi'da Islaamka, dhaqanka iyo anshaxa suuban ee Soomaalida, kana hufan eex, caburin, cadaalad darro, qabyaalad, quursi iyo wadaniyad xumo, kana saari karo umadda Soomaaliyeed jahawareerka siyaasadeed, dhaqaala xumida, faqriga iyo daryeel la'aanta ladegtaylaguna badbaadiyo jiritaanka midnimada umada Soomaaliyeed ee.

Madashu waxay astaysay in dhibaatada soomaaliya ay gun u tahay cadaalad darro waddada kaliya ee lagu samata bixin karana ay tahay in la helo xoriyad, cadaalad, dib uheshiisiin lahubiyey, wadaniyad iyo hufnaan.

Haddaba marki la xeeriyay arrimahaas, la garwaaqsaday baahida loo qabo samaynta xisbiga tilmaamahaas leh, la tixgeliyay Qod47 iyo 22(1/b) ee Dastuurka KMG, waxaa la go'aamiyay maanta ay taariikhdu tahay 26Juun 2014 Dhisidda Xisbiga Cadaaladda iyo Midnimadda.

CUTUBKA KOOBAAD

TILMAAMAHA XISBIGA

QODOBKA 1AAD

SIFADDA IYO DABEECADA XISBIGA

Xisbiga Cadaaladda iyo Midnimadda waa xisbi siyaasadeed, wadani ah mabaadi'diisuna ku qotonta shareecada islaamka, dhaqanka iyo anshaxa suuban ee soomaaliyeed iyo heer-tusaaleedka caalamiga ah. Xisbigu wuxuu ayyidayaa dhismaha dowlad soomaaloyeed ee kudhisan dimiquraadiyad iyo matlaada shacabka oo cadaalad iyo horrumarba u horseedo umada, dhowrtana qiyamka bini-aadannimo, xuriyada shakhsiga, ku dhaqanta diinteeda, dhaqankeeda suuban kuna abuurta shacabkeeda wadaniyadda.

Xisbigu wuxuu dhiiri gelinayaa cadaaladda iyo midnimadda bulshada, sinaanta wuxuuna diidayaa qabyaaladda, eexda, xaqiraadda, faquuqa iyo ujajabnaanta dhaqan dhaqaalaha ama dhaqan bulsheedka siloon iyo siyaasadaha aan u adeegeynin shacabka iyo dalka.

QODOBKA 2AAD

MAGACA XISBIGA

Magaca rasmiga ah ee xisbigu waa xisbiga Cadaaladda iyo Midnimadda oo looso gaabiyo (XCM) waxaana lagu naa neesaa (TIIR)

Xisbiga cadaalada iyo Midnimadda waa xisbi siyaasadeed utaagan Cadaaladda iyo Midnimadda umadda Soomaaliyeed

QODOBKA 3AAD

CALANKA XISBIGA

Calanka Xisbiga, Cadaalada iyo Midnimaddda midabkiisu waa Cadaan iyo Buluug oo dhexdana kuleh wareeg isla'eg oo midabkisu Cadaan yahay kuna dhexjira Geed Cagaaran

ama doog jiqq ah waxaana hoose kaga qoran (TIIR) oo naanesta xisbiga ah midabkeduna Cagaar yahay.

QODOBKA 4AAD

ASTAANTA XISBIGA

Astaanta xisbiga Cadaaladda iyo Midnimadda waxey ka koobantahay labo caleen oo Dhirta Mooska oo waareegsan kuna qoran ama ku wareegsan Magaca Xisbiga oo ku qoran far-Soomaali, Carabi iyo Ingiriis dhexdana waxaa kaga jiro miisaan dheelitiran oo kutaagan xarfaha Naanesta Xisbiga (TIIR) dushana waxaa ka saran miisaanka Xidig shangees midib Buluug ah.

QODOBKA5aad.

XARUNTA DHEXE EE XISBIGA

Xarunta dhexe ee xisbiga waa magaalo Madaxda Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya ee Muqdisho,Degmada Shangani Agagaarka Hotel Jubba, gaar ahaan kasoo horjeedka Jamacada City xaruunteda dhexe.

Xisbiga waxa uu xafiisyo ku yeelanayaa Gobolada iyo Degmooyinka Dalka. waxaa uu sidoo kale laamo ku yeelan karaa Dalka Dibadiisa.

QODOBKA6AAD

SHARCIYADDA XISBIGA

Xisbiga wuxuu leeyahay shaqsiyad qaanuuneed, waxaana uu ka diiwaangashan yahay Jamhuuriyadda Soomaaliya Xafiiska Diiwaangelinta ee Gudiga Doorashada

QODOBKA 7AAD

LUQADDA RASMIGA AH EE XISBIGA

Luqadda rasmiga ah ee xisbigu waa af-Soomaali (Maay iyo Maxaa tiri), luqadaha kale waa Carabga iyo Ingiriisiga.

CUTUBKA KOOBAAD

QODOBKA 8AAD

UJEEDOOYINKA IYO YOOLKA XISBIGA

Xisbiga,Cadaaladda iyo Midnimadda wuxuu u taaganyahay in uu xaqiijiyo yoolalka soo socdo:

1. Dhowrista madaxbanaanida, midnimada iyo wadajirka umadda Soomaaliyeed

2. Dhiiri gelinta siyaasadd dhex-dhaxaadka ku dhisan, iyo sare u qaadista soomaalinimada iyo islaamnimada.
3. Kor uqaadista, kobcinta iyo dhiiro gelinta horrumarka dhaqaalaha, waxbarashada iyo cadaaladda bulshada.
4. Ku beerista bulshada mabaadi'da nabad kuwada noolaashiyaha; sareeynta sharciga, wadaniyadda ayadoo loo marayo dhisidda dowlad dimuqaraadi, caadil ah u taagan xaqiijinta sinaanta muwaadiniinta dhisidda bulsha xadaarad leh kana madaxbanaan afkaar umada kale.
5. Kobcinta miyirka wadaniyeed iyo xoojinta dareenka daacad u noqoshada dadka iyo dalka.
6. Dhiiri gelinta horumarinta cilmiga, hal-abuurka si wadanka iyo dadkuba isku filnaashiyo xagga waxbarashada iyo wax soo-saarka ah u helaan
7. Sare u aqaadista garaadka iyo tarbiyada ubadka iyo dhalinyarada soomaaliyeed si la kobciyo aqoontooda si ay mustaqbal wanaagsan u helaan.
8. In lagu booriya bulshada is-caawintooda iyo iskufilnaantooda.

In kor loo qaado caadooyinka iyo dhaqanada suuban ee bulshada soomaliyed;

CUTUBKA LABAAD

HIMILADDA IYO HIIGSIGA XISBIGA

QODOBKA 9AAD

HIMILADDA XISBIGA

1. Dhowrista madax banaanida iyo siyaadada Dalka Soomaaliyeed.
2. Dhiiri gelinta siyaasad dhex-dhaxaadka ku dhisan, sare u qaadidda soomaalinimada iyo islaamnimada.
3. Abuuridda mabda'a sareeynta shacabka ayagoo waakiilanaya Dowlad Dimuquraadi cadaalad iyo xaqiijinta sinaan ka dhaxeeysa muwaadiniinta, kobcinta garaadka dhalinyarada si loo helo bulsho xadaarad leh oo u taagan ka shaqeeynta aayaheeda.
4. Horumarinta bulshada dhinacyada waxbarashada, dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada.
5. Ciribtirka musuqmaasuqa, madiidsiga iyo dagaalka qabyaaladda ee laga soo miinguuriyay casrul-jaahiliga si loo helo bulsho ilbax ah iyo dowladda cadaaladda bulshada u adeegto.

HIIGSIGA XISBIGA

- ✓ Wuxuu hiigsanayaa Mabda'a ku dhisan cadaalad, waxaana astaan u ah nabad iyo cadaalad ayaa lagu nagaadaa, ayaga ayaana baraare iyo barwaaqa horseeda.
- ✓ Wuxuu doonayaa in la helo Dastuur dhamaystiran ku yimid rabitaanka dadka Soomaaliyeed saldhiggiisu yahay Islaam, lahaanshiyahiisana Soomaali.

- ✓ Wuxuu tixgelinayaa wada noolaashiyaha, is-xaqdhowrka, daris wanaagga, is-caawinta iyo ka shaqeeynta cadaaladda bulshada.
- ✓ Wuxuu ixtiraamayaa, dhowrayaa nidaamka dowliga ah, sinaanta sharciga, xuquuqda aadanaha, hanaan ku qotoma isla xisaabtan iyo ilaalinta shuruucda dalka.
- ✓ Wuxuu u taaganyahay midnimada iyo wadajirka umadda Soomaaliyeed, nabadgelyada guud iyo hurumarka.
- ✓ Wuxuu diidan yahay eexda, qabyaaladda, kala dhantaalka umadda Soomaaliyeed.
- ✓ Wuxuu qadarinayaa wadamada dariska ah iyo dhammaan beesha caalamka, wuxuu xurmaynayaa shuruucda caalamiga ah, sidoo kale mabaadi'da Ururada Caalamiga ah sida Qaramada Midoobay, Ururka Jaamacada Carabta, Ururka Midowga Afrika, Midowga Yurub, Ururka Iskaashiga Wadama Islaamka iyo Urur Goboleedka IGAD.

QODOBKA 10AAD

MABAADII'DA GUUD EE XISBIGA

1. In kor loogu qaado cadaaladda iyo xoriyadda ee bulshada Soomaaliyeed.
2. In la ciribtiro dhammaan noocyada musuqmaasuqa oo ka hor imaanayo in lagaro cadaalad bulsho.
3. in la gaaro ciribtirka takoor nimadda ku saleysan jinsiyad asal ahaan , jinsi iyo midab ee bulshadda.
4. Si loo ilaaliyo , loo dhiiri galiyo korna loo qaado xuquuqda aadanaha iyo lala dagaalamo xadgudub kasta ee xuquuqda aadanaha ayado loo isticmaalayo hab kasta oo la heli karo.
5. In la dhiiri geliyo dhammaan muwaadiniinta Somaliyeed si firfircoon in ay uga qeyb galaan Hormarinta Cadaaladda si nabad warta ay uga wada noolaadaan.
6. In kor loogu qaado bulsho xor ah,taas oo qof kasta uu siman yahay iyadoo aan loo eegin dabaqada bulshada ee qofka uu katirsan yahay.
7. In kor loogu qaado lana taageero caadooyinka iyo dhaqamada istaahilo ee Soomaaliyeed oo dhan ,iyo in la ilaaliyo mabaadiida bulshadeena si cadaalada loo hormariyo.

QODOBKA 11AAD

BARNAAMIJKA SIYAASADEED EE XISBIGA

1. Siyaasada Xisbiga waa mid ku saleysan Mabadii'da Shareecadda Islaamka iyo qiyamka iyo dhaqanka suuban ee soomaaliyeed.
2. Barnaamijka Siyasadeed ee xisbiga wuxuu xambaarsan yahay mabadiida aas'aasiga ah sida Midnimo, Sinaan iyo Cadaalad, uhogaansanaanta sharuucda Dalka si ku dhisan Dimiquraadiyad.

CUTUBKA SEDAXAAD

QODOBKA 12AAD

KAMID NOQOSHA, XUBINIMADA XISBIGA IYO SHURUUDAHA KU BIIRISTA XISBIGA

Waxaa ku biiri kara Xisbiga qof kasta oo muwaadin ah una dhashay Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya oo ku nool Dalka gudahiisa ama dibadiisa,soona gudbiyay codsigiisa xubinimada Xisbiga haddii uu buuxiya shuruudaha ku qoran qodobka soosocda.

a) in uu yahay Muslim Somaali ah.
b) In aan da'diisu ka yareeyn 18 sano;
c) In uu maskaxiyan u fayowyahay, ahliya dhamaystirana leeyahay,awood buuxdana u leeyahay gudashada xilkiisa xubinimo.
d) In uu ku sifoobo toosnaan iyo akhlaaq wanaag
e) In uu aaminsanyahay mabaadi'da Xisbiga, iyo xaqiijinta ahdaafta Xisbiga;
f) In uu u hogaansamo xeerarka saldhiga u ah Xisbiga iyo dhammaan barnaamijyada siyaasadeed iyo xeer-hoosaadyada kale.
g) In aanu xubin ka ahayn Xisbi siyaasadeed kale.
h) In uu xubinimada u soo qorto arji laanta xisbiga ee ugu dhow ayna soo taskiyayso.
i) In uu bixiyo Qaaraanka Xisbiga oo Bil kasto ah Xadiga hadba ay go'aamiyaan Golaha Fulinta ee Xisbiga.
j) Inaan Maxkamad hore ugu xukumin danbiyada lidka ku ah jiritaanka Soomaaliya ama Khiyaano Qaran ama Dil bareer ah uu geystay.
k) In uusan kamid aheyn Shaqaalaha Dawladda,Ciidamada Qalabka Sida,Garsoorka iyo Diblamaasiyiinta Shaqada ku jira.

QODOBKA 13AAD

XUQUUQDA XUBNAHA KU BIIRAYA XISBIGA

Xubin kasto oo ku biirta Xisbiga waxay xaq u leedahay:

a) In uu helo Warqadda aqoonsiga ku biirista Xisbiga;
b) In uu daalacan karo xeerarka iyo qaraarada Xisbiga
c) In uu si xor ah u soo gudbin karo ra'yigiisa ku aadan arrimaha Siyaasadda, Maaliyadda iyo Maamulka Xisbiga, sidoo kale uu soona jeedin karo talooyin ama dhaliilo la xiriirka hawlaha Xisbiga.

d) In uu kaqeyb qaadan karo islamarkaana ka faa'iidaysan karo dhammaan howlaha Xisbiga
e) In uu dooran karo madaxda Xisbiga si waafaqsan nidaamka iyo xeer-hoosaadka Xisbiga.

QODOBKA 14AAD

HELITAANKA XUBINIMADA XISBIGA

Waxaa xubin buuxda ka noqon karo Xisbiga, qof kasta oo ku biiristiisa Xisbiga ay ka soo wareegtay muddo 3 sano ah oo aan lagu oogin Dacwad anshax- marineed, kana qeyb galay dhammaan Barnaamijyada Xisbiga si waafaqsan shuruudaha iyo xeer-hooseedyada Xisbiga.

QODOBKA 15AAD

XUBIN KANOQOSHADA GOLAYAASHA XISBIGA

Marka lagu daro xuquuqda xubnaha ku biirayaasha Xisbiga, xubin kasta oo buuxisa shuruurada ka mid noqoshada Xisbiga, buuxiyana tilmaamaha Qodobka 13AAD wuxuu xaq u leeyahay isu sharaxidda Mas'uuliyadaha hogaamineed ee soo socda:

1. Golaha Dhexe ee Xisbiga;
2. Golaha Fulinta
3. Guddoomiyaha Guddiga Fulinta
4. Guddiga Hanti dhowrka iyo Dabagalka

Kadib marka uu buuxiyo shuruudaha gaarka ah ee laga doonayo mas'uuliyadda.

QODOBKA 16AAD

XUQUUQDA XUBNAHA BUUXA EE XISBIGA

Xubin kasto ee ka tirsan Xisbiga waxay xaq u leedahay:

1- In lagu wargeliyo siyaasada iyo waxqabadka Xisbiga si joogta ah.
2- Inuu wax doorto ama lana doorto, waxaa loo magacaabi karaa derajo kasta iyo guddi kasta oo Xisbiga ama laamisiisa kamid ah.
3- in uu ka qeybgalo kulamada ama Shirarka laamaha Xisbiga ee Dalka guduhiisa ama dibediisa ee uu ka tirsan yahay.
4- Wuxuu ergo ahaan uga qeybgeli karaa Shirweyne qaran, hadii laanta uu ka tirsan yahay u soo igmato xilkaas.
5- wuxuu talooyin u soo jeedin karaa laamaha Xisbiga ee Dalka gudihiisa ama dibediisa ama golayaashiisa.
6- Xubin loo doortay Golayaasha Xisbiga ama gudiyadiisa, loogama saari karo sife ka duwan mid uu xeerka Xisbigu jideeyey.
7- Inuu si xor ah usoo bandhigi karo afkaartiisa soona jeedin karo talooyin ama dhaliilo la xidhiidha hawlaha Xisbiga.

8- Inuu si xor ah uga bixi karo Xisbiga isaga oo qoraal ku sababayna hase ahaatee wax Lacag ah looma celinaayo.
9- Waa in xubinta u soo gudbiso Arji is casilaad ah laanta uu ka tirsanyahay.
10- Waa in Xisbigu ka aqbalaa ama kadiidaa muda 25 maalmood gudahood ah is-casilaada xubinta.

QODOBKA 17AAD
OGOLAANSHAHA XUBINIMADA

Ogolaanshaha Xubinimada waxay ansaxmeysa marka Qofka/Qofta uu soo buuxiyo sharuudahaku xusan qodobka 12aad.
Sidookale wuxuu xubin buuxda noqonayaa marka uu saxiixo uuna balan qaado in uusan faafin doonin arimaha sirta ah iyo hanaanka shaqo ee Xisbiga.

QODOBKA 18AAD
WAAJIBAADKA GUUD EE XUBNAHA XISBIGA

Waajibka saaran cid kasto oo xubin ka ah Xisbiga waa:

1. Inuu u hogaansamo xeerka iyo go'aamada ka soo baxa masuuliyiinta Xisbiga heerkastaba ha ahaadee.
2. Inuu barnaamijka siyaasadeed iyo hawlaha Xisbiga u fuliyo si daacadnimo ah.
3. Inuu ka qayb qaato hirgalinta barnaamijka Xisbiga, adeega, Horumarinta bulshadiisa iyo abaabulka Ummadiisa.
4. Inuu ilaaliyo sirta, Hantida iyo Sumcada Xisbiga.
5. Inuu ummadiisa ku abuuro ama ku abaabulo dareen wadaninimo.
6. Inuu xog ogaal u noqdo xaalada siyaasadeed iyo dhaqaale ee Wadanka.
7. Inuu ka hortago wixii iska horimaad Bulsho abuuri kara sida kala sooc iyo qaraabo kiil.
8. In uu soo bandhigo wixii tabasho ah Xisbiga gudihiisa laakiin ayna banaanayn inuu banaanka usaaro.
9. In uusan qaban karin jago/mansab siyaasadeed ilaa uu ogolaashiyo ka helo Golaha Dhexe iyo Golaha Fulinta Xisbiga si waafaqsan shuruurcda iyo xeerarka Xisbiga.
10. In uuna la yeelan wax xiriir siyaasadeed oo rasmi ah dhinac ajnabi ah (Hay'ad, Wadan ama jiho kale) ilaa uu ka helo ogolaashiyo iyo qaraar rasmi ah ee Golaha Fulinta Xisbiga
11. In uu xafido sirta Xisbiga.

QODOBKA 19AAD
WAAYIDDA XUBINIMADA

Qof kasta oo xubin ah Xisbiga waxa uu xubinimadiisa ku weeyn karaa:

1. Haddii uu iska casilo xubunimada Xisbiga sida ku xusan Qodobka 16AAD ee Xisbiga, lagana ogolaado.
2. Haddii geeri ku timaad.
3. Xilkiisa gudan waayo sabab Caafimaad darteed
4. Haddii uu waayo ahliyaddi qaanuuneed ama xil gudasha la'aan joogta ah.

5. Haddii uu ku biiro Xisbi kale ee siyaasadeed ama uu Xisbi samaysto.
6. Hadduu la yimaad fal lid ku ah jiritaanka Xisbiga ama uu kabiyay meelna uga dhacay xeerka Xisbiga.

CUTUBKA AFARAAD
HAYKALKA IYO QAAB-DHISMEEDKA XISBIGA
QODOBKA 20AAD

Qaab dhismeedka Xisbiga waxa uu ka kooban yahay sadexda heerar ee soosocda:

1. Heer Dhexe
2. Heer Gobol iyo Degmo
3. Laamaha Dibadda

QODOBKA 21AAD
HEERKA DHEXE EE XISBIGA

Heerka dhexe ee gudiga waxaa uu ka kooban yahay:

1) Shirweynaha Guud ee Xisbiga
2) Golaha Dhexe
3) Golaha Fulinta
4) Guddiga Hanti dhowrka iyo Dabagalka

QODOBKA 22AAD
SHIRWEYNAHA GUUD EE XISBIGA

Shirweynaha guud ee xisbiga waa hay'adda ugu sareeysa xisbiga sharci ahaan xagga awoodda, waxayna ka koobantahay:

1. Dhammaan xubnaha Golaha dhexe ee Xisbiga;
2. Xubno ka socdo Golayaasha Fulinta, Gudoomiyaha Xisbiga iyo Gudoomiye ku xigeenka
3. Xubna ka kala socda Gobollada, Degmooyinka iyo laamaha Dibadda.
4. Xubnaha kaga jira Golayaasha Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada
5. Golaha dhexe ee Xisbiga ayaa dooranaya laba Guddi oo ka shaqeeysa habsami u socodka Shirweynaha Guud.
   a)Guddiga Koowaad wuxuu diyaarinaya ajandayaasha Shirka looga hadlayo, halka
   b) Guddiga labaad uu diyaarinayo isagoo kaashanaya Golaha Fulinta tashiilaadka iyo fududeeynta maadiga ah ee Shirka.
6. Tirada xubnaha Shirwaynuha waxaa go'aan ka gaaraya Golaha Fulinta ee Xisbiga.

QODOBKA 23AAD
SHIRWEYNAHA CAADIGA AH EE XISBIGA

1. Shirwaynaha caadiga ah ee Xisbiga waxaa la qabanayaa 4 Sanaba mar oo laga soo bilaabo Maalinta uu xirmay shirwaynihii u dambeeyay, waxaana soo jeedinaya maalinta laqabanayo iyo goobta lagu qabanayo Gudiga Fulinta, wuxuuna ku ansaxmayaa cod

haldheeri ah oo Golaha dhexe uqaadaan Sadex Bilood ka hor inta aanay dhamaan mudada afarta sano ah. Waxaana 60 Maalmood ka hor Maalinta loo cayimay baahinaya Gudida Fulinta.

2. Xubnaha kasoo qaybgalaya waxaa cayimaadooda soo jeedinaaya Gudida Fulinta, waana in soo jeedinta cayimaada ay ansixiyaan Golaha dhexe kalfadhiga rasmiga ah ama kalfadhi aan caadi ahayn.

3. Xubnaha waxaa soo xulaaya gudiyada heer Gobol iyo Degmo.

4. Guddiga qabanqaabada waxaa magacaabaya Gudoomiyaha Xisbiga marka uu la tashta hogaanka sare ee Xisbiga.

QODOBKA 24AAD
SHIRWEYNE AAN CAADI AHAYN

Shirweynaha aan caadiga ahayn waxaa la qaban karaa marka uu codsado ama uu soo jeediyo Guddoomiyaha Xisbiga ama ay soo codsadaan 3/2 Xubnaha Golaha Dhexe ama 3/1 Xubnaha Guud ee Xisbiga .Golaha dhexe waxaa uu cayimayaa mudada la qabanayo Shirwaynaha aan caadiga ahayn iyo goobta lagu qabanaayo waxaa baahinaya Golaha Fulinta mudo 30 Maalmood gudahood ah.
Ergada Shirwaynaha aan caadiga ahayn waa ergadii Shirwaynahii u danbeeyey ka qayb gashay, haddii kooramku buuxsami waayo, waxaa la qabanayaa Shirka muddo 24 saacadood gudahood ah taasoo uu ku ansaxmayo tirade soo xaadirta.

QODOBKA 25AAD
HABKA IYO AJANDAHA SHIRWEYNAHA GUUD EE XISBIGA

Waxaa diyaarinaya ajandayaashada iyo jadwalka shaqo ee Shirweynaha- Golaha Dhexe ee Xisbiga, wuxuuna noqonaya habka iyo hanaanka ay isku raacaan dhammaan xubnaha guud ee Xisbiga. Haddii Shirku yahay Shir aan caadi ahayn waxaa diyaarinaya dhinaca soo codsaday ama soo jeediyay qabsoomidda Shirka aan caadi ahayd. Waxaa ajandaha iyo hanaanka Shirka loo soo gudbinayaa muddo laba (2) Isbuuc gudohood ah Golaha Fulinta Xisbiga.

QODOBKA 26AAD
XILKA IYO WAAJIBAADKA SHIRWEYNAHA

Shirweynaha guud ee Xisbiga waxa uu leeyahay awoodaha iyo masuuliyadaha soo socda:

1- Ansixinta iyo wax-ka bedelka xeerarka, barnaamijyada Siyaasadeed iyo go'aanada Golayaasha Xisbiga(Golaha Dhexe iyo Golaha Fulinta)
2- Doorashada Hogaanka Xisbiga sida: Gudoomiye, Gudoomiye ku xigeenka koowaad, kan labaad ilaa iyo kuxigeenka Shanaad iyo Xoghayaha Guud iyo ku-xigeenka Xoghayaha Guud.
3- Go'aaminta Siyaasada iyo qorshayaasha Guud ee Xisbiga
4- Doorashada xubnaha Golaha Dhexe ee Xisbiga

5- Ansixinta go'aamada ay soo gudbiyaan Golaha Fulinta iyo Golaha Dhexe.
6- Go'aamada Shirweynaha waxaa lagu ansixinayaa cod hal dheeri ah (simple majority) oo gacan taag ah.
7- Waxa uu dhegeysanyaa warbixinaha ergooyinka Gobollada iyo laamaha Dibidda.
8- Shirweynuhu wuxuu awood u leeyahay inuu u wakiisho Gudoomiyaha Xisbiga dhamaystirka xubnaha hoggaanka ama Guddida Fulinta haddii aan lagu dhamaystirin Shirweynaha isaga oo la tashanaya Guddida Fulinta.

QODOBKA 27AAD

GOLAHA DHEXE

Golaha dhexe ee Xisbiga waxay masuuliyadaha u gutaan si waafaqsan Xeerka Xisbiga, waxayna ka koobanyihiin 125 Xubnood .Golaha dhexe ee Xisbigu waa Hay'ada hagaysa hawlaha Xisbiga inta u dhaxeysa labada Shirweyne. Sadex dalool laba dalool(2/3) kamid ah waxaa lagu doortaa Shirweynaha ayadoo codeeyntu noqonayso qaab sir ah, kuwaasoo noqonaya dufcada ugu horeeysa ee Golaha Dhexe, halka saddex dalool hal dalool (1/3) xubnaha Golaha Dhexe ee Xisbiga Doorashadooda lagu salaynayo qaab mudnaan ah ayadoo la eegayo firfircoonidooda waxaana si gaar ah looga soo xulanayaa Dhalinyarada, Haweenka, iyo xubnaha ku jiro golayaasha Qaranka ee heer Federaal iyo Dowlad Goboleed. Marka ay banaanaato xubin Golaha Dhexe ka tirsan oo lagu doortay Shirweynaha, waxaa lagu bedelayaa ayadoo loo noqonayo natiijada Doorashadi hore Qofka ugu codka badnayd Dadka aan la dooran haddii ay banaanaato xubin lagu Doortay habka mudnaanta, waxaa soo buuxinaya Golaha Dhexe ayadoo la raacayo tilmaamaha faqrada hore ee qodobkaan. Liiska xubnaha Golaha Dhexe ee lagu Doortay Shirweyne waa in ayagoo dhamaystiran loo gudbiyaa Hay'adaha ku shaqada leh muddo aan ka yarayn 30 Maalmood.

QODOBKA 28AAD

SHURUUDA XUBINIMADA GOLAHA DHEXE

Sharuudaha xubinimada Golaha Dhexe waa:

1. In uu xubin firfircoon ka ahaa Xisbiga muddo aan ka yarayn 3 sano.
2. In uu ugu yaraan muddo sanad ah ka shaqeeynaya Xafiiska kamid ah Xafiisyada Xisbiga.
3. in uu soo buuxiyo sharuudaha kuxusan Qodobka 18AAD ee xeerkan.
4. Waa in uu heerka aqoontisa tahay Dugsi Sare ama uu leeyahay Khibrad iyo waayo-aragnimo u dhiganta.

QODOBKA 29AAD

GUDOONKA, XAFIISKA GOLAHA DHEXE IYO GUDDIGA JOOGTADA AH EE GOLAHA

Fadhiga ugu horreeya ee Golaha Dhexe, inta aan la dooranayo Gudoomiyaha iyo Afartiisa ku-xigeen, waxaa si ku-meel gaar ah u guddoominaya Xubinta ugu da'da weyn xubnaha Golaha oo ay caawinayaan labada xubnood ee ugu da'da yar, waxaana Shir gudoominaya Doorashada Guddoomiyaha iyo labadiisa ku-xigeen, guddoomiyaha iyo ku-xigeenadiisa waxaa cod qarsoodi ah oo aqlabiyad ah ku dooranaya xubnaha Golaha Dhexe ee Xisbiga.

Godoomiyuhu wuxuu u soo jeediyaa Golaha Dhexe Guddiyada Golaha. Golaha Dhexe wuxuu Magacaabaa Guddiyo gaar ah oo ka saacido Golaha gudashada shaqadooda.

QODOBKA 30AAD

HOWLAHA GOLAHA DHEXE EE XISBIGA

1. Dejinta qorshooyinka iyo Barnaamijyada siyaasadeed lagu hogaaminayo, laguna hormarinayo Xisbiga
2. Magacaabista iyo u codeeynta cidda noqonaysa musharaxa madaxweynaha Jamhuuriyadda ama Gudoomiyaha Baarlamaanka ee ku imaanaysa Magaca Xisbiga
3. Taskiyaynta iyo Magacaabista Dadka u matalaya Xisbiga jagooyinka Dowladda marka uu soo gudbiyo Madaxweynaha Jamhiiriyadda Musharaxiinta ugu firfircoon ama ay soo gudbiyaan Golaha Fulinta Xisbiga haddii uusan Madaxweynuhu ahayn Gudoomiyaha Xisbiga.
4. Koormeeridda iyo la xisaabtanka Hay'adaha Fulinta ee Xisbiga
5. Ansixinta, wax ka bedelka ama diidista xeerarka la horkeeno.
6. Samaynta iyo diyaarinta xeer-hoosaadyada lagu nidaaminayo habka shaqo ee Golaha Dhexe ee Xisbiga, waxaana soo jeedinaya Gudoomiyaha ama 10 xubnood oo kamid ah Golaha.
7. U kuur-gelidda dhaqangelinta Xeerka iyo Xeer-hooseedyada Xisbiga.
8. Ansixinta Miisaaniyad Sannadeedka iyo xisaab xirkeeda ee Xisbiga.
9. Diyaarinta shuruudaha iyo hanaanka lagu dooranayo musharaxiinta Xisbiga ee Baarlamaanka iyo Hay'adaha kale ee Dowladda, heer Federal iyo heer Dowlad Goboleedba
10. Waxay iska dhex dooranaayan Guddoomiyaha , ku xigeenadiisa, Xoghaya Guud iyo ku xigeekiisa iyo xil ka qaadistooda.
11. Dhagaysanayaan warbixinada ay usoo gudbiyaan Gudida Fulintu waxayna qiimaynayaan waxqabadka Gudida iyo horumarka hawlaha Xisbiga iyagoo ka doodaya arimahaasi muhiimka ah kadibna go,aan ka soo saaraya.
12. Dib u eegista duritaanada laga keenay qaraarada anshax marinta.
13. Ansixinta shuruucda, xeerarka iyo nidaamiya-yaalka kale uu soo gudbiyo golaha fulinta.
14. Soo badhigidda Hinsidaha wax ka bedelka nidaamka saldhigga u ah Shirweynaha guud ee Xisbiga
15. Kalsooni kala noqoshaha Golaha Fulinta ama xubin kamid ah
16. Diyaarinta Shirweynaha guud ee Xisbiga si waafaqsan xeer-hoosaadka Xisbiga
17. Diyaarinta xeerka nidaaminaya guddiyada hanti dhowrka iyo dabagalka iyo Guddiga Anshaxa ee Xisbiga.
18. Doorashada, la xisaabtanka iyo xil-ka-qaadista xubnaha guddi hooseedyada ee uu horkeeno Golaha Fulinta.
19. Buuxinta xubnaha Golaha Dhexe ee booskoodu banaanaado

QODOBKA 31AAD

FADHIYADA GOLAHA DHEXE

Fadhiga Golaha Dhexe waxaa la qabanayaa 6 biloodba mar, laga bilaabo maalinti uu xirmay fadhigii ugu danbeeyay iyo markasta ay timaado duruuf ayadoo Gudoomiyuhu codsanayo ama ay dalbadaan Sadex dalaal hal dalool(3/2) Xubnaha guud ee Golaha ama Gudoomiyaha Xisbigu uu codsado.

Waxaa cayimaya maalinta laqabanayo fadhiga Golaha Dhexe Xoghayaha Golaha dhexe. waa in Xoghayaha Golaha Dhexe ku baahiyaa muddo aan ka badnayn 10 maalmood, haddii uu maqan yahayna waxaa muddadaa ku baahinaya ku-xigeenka Xoghaya Golaha Dhexe.

QODOBKA 32AAD

GOLAHA FULINTA

1. Guddiga Fulinta waa Hay'adda ugu sarraysa socodsiinta hawlaha Xisbiga.
2. Guddiga waxa uu ka kooban yahay; Guddoomiyaha Xisbiga, Ku-xigeennada oo (4) ah, Xoghaya-Guud iyo 18 Xoghaye Fulin oo laga soo dhax xulay xubnaha Xisbiga.
3. Muddada xil - heynta Guddiga Fulintu waa (4) Afar Sano.
4. Ansixinta Guddiga Fulinta waxay noqonayna 50+1, aqlabiyad haldheeri ah ee tirada guud ee xubnaha Golaha Dhexe

FADHIYADA GOLAHA FULINTA

Fadhiga Golaha Fulinta ee Xisbiga waa mid joogta ah waxaa la qabanayaa isbuuci 1 mar ama 2 mar, wuxuuna ansax noqonaya kooramka kulanka Golaha markii Sadex dalaal hal dalool(3/2) Xubnaha guud ee Golaha ay uwada dhanyihiin kulanka..

waxaana Shir Gudoominya Xoghayaha Guud ee Xisbiga, hadii lawaayo Xoghaye ku-xigenkagolaha ee Xisbiga.

QODOBKA 33AAD

WAAJIBAADKA & XUQUQDA XUBNAHA GOLAHA FULINTA

Golaha Fulintu oo uu masuul ka yahay Gudoomiyaha Xisbiga, waxay u xilsaaranyihiin shaqooyinka soo socda:

a) WAAJIBAADKA

1) Diyaarinta nidaam hooseed uu ku shaqeeynayo Golaha Fulinta Xisbiga
2) Fulinta dhammaan go'aamada iyo qaraarada ka soo baxay Shirweynaha iyo Golaha Dhexe ee Xisbiga
3) Diyaarinta qorshe howleed Xisbiga(Bile, Sadex Bile iyo Sanadle)
4) Dejinta haykal nidaam ee Golaha iyo u soo bandhigidooda Golaha Dhexe si ay u ansixiyaan.
5) Diyaarinta Miisaaniyadda guud ee Xisbiga, ka warbixinta iyo fulinteeda marka ay ansixiyaan Golaha Dhexe ee Xisbiga.

6) Go'aan ka qaadashada dhammaan barnaamijyada siyaasadeed ee ku saabsan Dalka iyo Dowladda.
7) Yagleelidda Xafiisya Dhexe , guddiyo heer Federaal, heer Dowlad Goobleed, heer Degmo, Tuulo iyo Laamo Dibadda ah ayadoo la raacayo nidaam hooseedka Golaha.
8) Dhisidda Guddiyo joogta ama kumeel gaar
9) Doorashada Murashaxiinta Xisbiga uga qeyb-galaya Doorashooyinka Dalka heer Federaal, Dowlad Goboleed iyo Dowlad Hoose iwm, ayadoo la raacaya shuruudaha iyo hanaanka uu jideeyo Golaha Dhexe ee Xisbiga.
1) Abaabulka iyo wacyi galinta Dadweynaha iyo hirgalinta hadafka siyaasadeed ee Xisbiga oo ku dhisan Maamul suuban iyo talo wadaaga.

b) XUQUUQDA

10) Xubanaha Gudiga Fulinta waxey yeelaneyan saxiix idman oo la xiriira howlahooda ama waafaqsan Xafiisyadooda Shaqo.
11) Sidoo kale waxey leeyhin xasaanad Xisbiga dhexdiiisa ah
12) Xubanaha Golaha Fulinta waxey yeelaneyan guno hadba wixii Xisbigu u awoodo
13) Saraakiisha Golaha waxay xaq u leeyihiin inay shaqaaleyaan Shaqaalaha Xisbigu u baahdo, ceyriyaan hadii danbiyo cadd lagu helo, go'an kagaaran Shaqada nuuceda iyo waajibadkisa iyo gunada isla markaana maamulan dhammaan arimaha Xisbiga.
14) Sidoo kale waxey xaq u leeyihin iney ka waramaan ama ka warbixiyaan howlaha Xisbiga , Maamulaanna Dhaqaalaha iyo Hantida Xisbiga.

QODOBKA 34AAD

QAAB DHISMEEDKA IYO XILALKA XUBNAHA GOLAHA FULINTA XISBIGA.

A) Qaab Dhismeedka Xisbiga

1) Xubnaha Xisbiga.....
2) Shirweynaha Xisbiga.....
3) Golaha Dhexe ee Xisbiga.....
4) Golaha Fulinta Xisbiga.....
5) Guddiyo Madaxbanaan.....
6) Wakiillo heer M/Goboleed.....
7) Wakiillo heer Gobol.....
8) Wakiillo heer Degmo.....
9) Wakiillo heer Tuulo.....

B) Xilalka Xubnaha Golaha Fulinta

Xilalka xubnaha Guddiga Fulinta Guddiga Fulintu wuxuu ka kooban yahay 21 xubnood oo xilalkoodu ay kala yihiin:
Gudoomiyaha Guddiga Fulinta, ahna Gudoomiyaha Xisbiga
Afar Gudoomiye ku xigeen

1. Xoghayaha Guud ee Xisbiga.
2. Ku xigeenka Xogheeyaha guud

3. Xoghayaha, Horumarinta & Baahinta, Abaabulka iyo Wacyigelinta Xisbiga.
4. Xoghayaha Arrimaha Dibadda iyo xiriirka Jaaliyadaha.
5. Xoghayaha Waxbarashada iyo Cilmi barista
6. Xogyaha Warfaafinta, Isgaarsiinta iyo Teknologiyada
7. Xoghayaha Maaliyada iyo Qorshaynta.
8. Xoghayaha Dhaqaalaha iyo Horumarinta wax soosaarka
9. Xoghayaha Arrimaha Bulshada iyo Xuquuqda Aadmiga.
10. Xoghayaha Arimaha Gudaha, Dowlad Gobeleedyadda & Amniga
11. Xoghayaha Cadaaladda iyo arimaha Dastuurka
12. Xoghayaha Dhallinyarada iyo Cayaaraha Xoghayaha Arrimaha Diinta iyo Awqaafta
13. Xoghayaha Arrimaha Haweenka iyo Horumarinta Qoyska.
14. Xoghayaha Shaqada iyo Shaqaalaha
15. Xoghayaha Caafimaadka, Samafalka iyo Adeegga Bulshada
16. Xoghayaha Dib u heshiisiinta iyo Nabadeeynta

QODOBKA 35AAD

GUDDOOMIYAHA XISBIGA

Guddoomiyuhu waa madaxa Xisbiga, wuxuuna Guddoominayaa Shirwaynaha iyo Fadhiyada Golaha Dhexe, waana Guddoomiyaha Golaha Fulinta mudada uu xilka haynaaya waa Shan Sano.

QODOBKA 36AAD

SHURUUDAHA DOORASHADA GUDOOMIYANIMADA XISBIGA

Waxaa loo dooran karaa xilka Gudoomiyaha Xisbiga Muwaaddin kasta oo buuxiya Shuruudaha soo socda:

a) Muwaadin Soomaali, Muslim ah.
b) Da'adiisu aanay ka yarayn 35 Sano.
c) Dhimirkiisu dhan yahay
d) Leh Aqoon heer Jaamacadeed ama waayo'aragnimo u qalanta xilkaas
e) Gelin Denbi culus oo ay Maxkamadi Xukuntay
f) Xubin buuxda ka ahaa Xisbiga muddo 3 Billood ah.

QODOBKA 37AAD

DOORASHADA GUDOOMIYAHA XISBIGA

Gudoomiyaha Xisbiga waxaa Dooranayo Shirweynaha Guud ee Xisbiga.
Codeeynta Gudoomiyaha iyo Ku-xigeenadiisa waxay noqonaysaa hab qarsoodi ah, waxaana Gudoomiye loo dooranayaa Musharaxa helo ku guulaysiga Aqlabiyadda 50+1 ee tirada Codeeysay. haddii Musharax ku guulaysan waayo waxaa loo qaadayaa Codeeyn Labaad

Labada Musharax ee ugu Codka badan, haddii ay isku cod helaan, waxaa la Dooranayaa Qofka ugu Da'da weyn uguna waayo aragsan(Khibrad iyo Tacliinba).
Gudoomiyaha Xisbigu wuxuu Xilka haynayaa muddo Shan(5) Sano ah oo ka bilaabmaysa Maalinta Xilka loo dhaariyo, qofna looma dooran karo Gudoomiyanimo wax kabadan laba jeer.

QODOBKA 38AAD
WAAJIBAADKA GUDOOMIYAHA

a) Wuxuu fuliyaa, dhowraa isla markaasna ilaaliyaa nidaamka Golaha Fulinta ee Xisbiga.
b) Wuxuu Fuliyaa Siyaasadaha Xisbiga iyo Qorshooyinkiisa si waafaqsan xeer Xisbiga
c) Wuxuu dhowraa habsami u socodka howlaha Xisbiga iyo kormeerista Shaqada Xogyaha iyo Ku-xigeenadiisa.
d) Wuxuu furaa, soo jeediyaa Shirweynaha iyo Fadhiyada Golaha Dhexe ee Xisbiga.
e) Wuxuu soo saaraa Qaraarada Cafis iyo fududeeynta Ciqaabaadka Anshax marinta.
f) Wuxuu u idman yahay matalidda Xisbiga iyo Saxiixa Heshiisyada Gudaha iyo dibadda.
g) Waxaa uu masuul ka yahay Hantida guud ee Xisbiga.
h) Waxaa uu leeyahay dhamaan Masuuliyadaha kale ee ku xusan Xeer hoosaadyada Xisbiga ee ay sameeyeen Shirweynaha guud iyo Golaha Dhexe.

QODOBKA 39AAD
BANAANANTA JAGADA GUDOOMIYINIMADA

Gudoomiyaha waxaa uu Xilka ku waayi karaa arrimaha soo socda:

a) Geeri
b) Istiqaalo Qoraal ah oo u soo gudbiyo Golaha Dhexe ama mid Oraah ah uu ka sii daayo Warbaahinta. Istiqaalada waa in ay aqbalaan Sadex dalool Laba(2/3) ee Golaha Dhexe
c) Ku xadgudub Diinta Islaamka, Dastuurka Qaranka ama Shuruucda kale ee Dalka.
d) Xil gudasha la'aan joogta ah.
e) Mar kasta oo ay muddadu ka dhamaato

QODOBKA 40AAD
GUDOOMIYE KU-XIGEENADA XISBIGA

Xisbiga waxaa uu yeelanayaa (4) Afar guddoomiye ku xigeen, oo xilalkooda kala yihiin sida soo socota: -

1) Guddoomiye ku xigeenka Arrimaha Siyaasadda iyo Istaratejiyadda.
2) Guddoomiye ku xigeenka Arrimaha Dowlad Goboleedyada.
3) Guddoomiye ku xigeenka Arrimaha Xubnaha, Bulshada iyo Wacyigalinta.
4) Guddoomiye ku xigeenka Arrimaha Qorshaynta iyo Horumarinta Xisbiga.

Guddoomiye ku xigeenka Arimaha Siyaasada iyo Istarategoyada waa ku simaha Gudoomiyaha marka uu Guddomiyaha maqan yahay. hadii u maqnaadana waxaa xilka Gudoomiyaha qaban doona hadba G. Ku xigeenkii uu u xilsaaro Guddomiyaha Xisbigu.
Marka laga Reebo howlaha ay gaarka u leeyihiin, Guddoomiye ku xigeennadu waxa ay qabanayaan howlaha uu u igmado Guddoomiyaha Xisbiga si waafaqsan Xeerka Xisbiga. haddii Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenasia ay ka maqan yihiin ama aaneey awoodin in ay soo xaadiraan ama shaqadooda gutaan, waxaa xubnaha Golaha Dhexe iska dhax-dooranayaan xubin si ku meel gaar ah u qabata howshooda, waxayna u baahanyihiin Cod hal-dheeri ah (50+1) oo gacan taag ah.

QODOBKA 41AAD

XOGHAYAHA GUUD IYO KU-XIGEENKIISA.

Xoghayaha guud ee Xisbiga iyo ku-xigeenadiisa waxa ay u xilsaaranyihiin:

a) Diyaarinta Qoraalada, Warbixinada, iyo Ajandayaasha lagaga hadlayo fadhiyada Golaha Fulinta, Golaha Dhexe iyo Shirweynaha Guud.
b) Kormeerka xoghaya-yaasha Xisbiga marka ay gudanayaan waajibaad-kooda Shaqo iyo la xisaabtankooda.
c) Hubinta iyo diyaarinta qoraalada ay u baahanyihiin xubnaha labada gole ee Xisbiga;
d) Hubinta guntanka Shirka Golaha Fulinta iyo qaadista maxdarada Fadhiyada Golaha.
e) Hubinta saxnimada qoraalada iyo xanaanaynta Buuga Diiwaangelinta xaadirinta Xubnaha Golaha.
f) Hubinta in dhammaan go'aannada iyo xeerarka Golahu soo saareen ay raad-raac sax laga reebo si wannagsanna loo diiwaangeliyo.
g) Daba-galka Fulinta go'aanada la saxiixay iyo Hirgelinta Barnaamijyada Siyaasadeed, isagoo gacan ka helaya xog-yaha-yaasha masuulka ka ah Shaqadaas.
h) La Xisaabtanka Xoghaya-yaasha kale ee Golaha Fulinta Xisbiga iyo ku kormeeridda habsami u socodka howlaha ay u xilsaaranyihiin.

CUTUBKA SHANAAD

QODOBKA 42AAD

HABKA MAAMULKA IYO MAAREYNTA HANTIDA XISBIGA

Xisbiga Midnimada Iyo Cadaalada TIIR wuxuu yeelanayaa gudi dhaqaalo oo Qaabilsan Hantida Iyo Maaliyada Xisbiga, oo leh

Cudud Aqooned, Qibrad iyo waaya aragnimo farsamo/xirfad laxiriirta shaqadoda**.**

1) **ILHA DHAQAALAHA EE XISBIGA**

a) Khidmada diiwan galinta ee Xubinnimada Xisbiga
b) khidmada cusbooneysiinta Xubinnimada Xisbiga
c) Maal galin

d) Deeqaha
e) Dhaqaale aruurin
f) Hadiyadaha iyo Yabooha
g) Deymaha
a) Ilaalinta iyo Maamulka Dhaqaalaha Xisbiga waxaa u xilsaaran Gudiga Maaliyada Xisaabiyaha Guud ee Xisbiga iyo Hanti dhowraha Xisbiga iyaga ayaana la weydiinayaa wixii macluumaad la xiriira Dhaqaalaha iyo Hantida Guud ee Xisbiga

2) **GUDIGA HANTI DHOWRKA IYO DABAGALKA**

Golaha Dhexe ee Xisbiga ayaa Dooranaya Guddiga Hanti dhowrka iyo Dabagalka Hantida iyo Xisaabaadka Maaliyadeed ee Xisbiga, waxaa uuna ka koobanyahay Sadex xubnood oo ay Golaha Dhexe iska soo dhexdoortaan una madax-banaan shaqadooda, waxaana Ansixinaya Golaha Dhexe ee Xisbiga, Xilalka Guddiga waxaa ka mid ah:

a) Waxay baaritaan iyo dabagal ku samayn karaan dhammaan Xafiisyada, Laamaha iyo Koontooyinka Xisbiga, waxayna warbixin toos ah siin karaan Golaha Dhexe ee Xisbiga.
b) Waxay toosin karaan hanaanka Xisaabeed ee Xisbiga.
c) Waxay hubinayaan dhammaan Hantida Xisbiga Guurto iyo Maguurto iyo dhammaan agabyada kale ee uu Xisbigu ku howl galo.
d) Waxey shaqada ka joojin karaan dhammaan Hay'adaha iyo Guddiyada Xisbiga haddii ay u arkaan lagama maarmaan ama ay u muuqato ku tagri-fal ama Musuqmaasuq Hantiyeed ee Hantida Xisbiga, ayagoo u gudbinayo qaab Qoraal ah Golaha Dhexe ee Xisbiga.

CUTUBKA LIXAAD

QODOBKA 43AAD

XAFIISKA SHAQAALAHA IYO HAWLWADEENADA XISBIGA.

a. Xisbiga Cadaalada Iyo Midnimada (**TIIR)** Wuxuu yeelanayaa xafiis qaabilsan Shaqaalaha iyo Howladeenada Xisbiga.
b. Xafiiska Shaqaalaha iyo Howlwdeenada wuxuu hoostagaya xubnaha Gudiga Fulinta
c. Xafiis kasta uu Xisbiga leeyahay waxaa uu yeelanayaa Madax iyo Maamul maareeya Howlwadeenada iyo Shaqaalaha Xafiiskaas.
d. Xafiiska Shaqaalaha iyo Hawlwadeenada Xisbiga wuxuu Ilaalin Doonaa Qoondada Haweenka iyo Dadka Laga Tirada Badanyahey.
e. Sidoo Kale Xafiisku wuxuu Dhawrayaa Qawaaniinta Dalka &Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah iyo Kuwa Caalamiga ah.

QODOBKA 44AAD

XOGTA & SHURUUDAHA SHAQAALEYNTA

a. Marka uu Xisbiga Shaqaale qoranayo baahida Shaqaale ee Xisbiga waxaa lagu soo bandhigayaa Warbaahinta.

b. Marka uu Xisbiga Shaqaale qoranayo waxaa muhiimad gaar ah la siinayaa Haweenka iyo Dadka laga Tirada badanyahay.
c. Waxaa Shaqaalaha loo qaadanayaa hadba xirfada iyo Aqoonta Qofkaasi leeyahay ayadoo la tixgalinayo Deeganka ama Goobta Shaqada ka banan ee Xisbiga isla markaana buuxiyaa Qof Deeganka u dhashay oo leh xirfada iyo Aqoonta Booska Shaqo ee banaan.
d. Xogta iyo Dokumentska Shaqaalaha Xisbiga waxaa lagu xifdin doona meel Arkivia u gaara ayadoo uu masuuliyada Xifdinta iyo Ilaalinta lahaan doono Xafiiska Xogyaha qaban qaabada Barnaamijyada Xisbiga.
e. Shaqaalaha uu Xisbigu qorto waxaa howlgelinaya Gudiga Fulinta marka uu Gudoomiyuhu Saxiixo waxaana ogeysiin la siinayaa Xogheyaha Guud iyo Golaha Dhexe.

QODOBKA 45AAD
SARAAKIISHA IDMAN

a. Dhamaan Xubnaha Gudiga Fulinta Xisbiga waxay yeelanayaan Saxiix Idman oo la xiriira Howlahooda Xisbiga.
b. Xafiisyada Sida gaarka u'idman waxaa kamida.
    1. Xafiiska Gudoomiyaha,
    2. G/kuxigenka,
    3. Xoghayaha Guud,
    4. Kuxigeen X/Guud,
    5. Xogahaya Qorsheynta iyo Maaliyada,
    6. Xoghayaha Arimaha Dibada, iyo
    7. Xoghayaha Arimaha Gudaha
c. Sidoo kale waxay yeelanayaa Xasaanad Xisbiga dhexdiisa ah.
d. Xog'heyayaasha Xubnaha Gudiga Fulita ee Xisbiga waxa ay yeelanayaan Saxiix Idman oo la xiriira Howlahooda Xisbiga dhexdiisa ah
e. Wixii ka baxsan Xisbiga gudihiisa waa iney ka muuqdan Saxiiga Gudoomiyaha iyo Xoghaya Guud ee Xisbiga.

QODOBKA 46AAD
BANAANAANTA XAFIISYADA IDMAN EE XISBIGA

1. Hadii aay timaado in Hogaanka Xafiisyada Idman ee Xisbiga Xubin ama Xubno ka mid ah aay Lumiso/Lumiyaan xilkii ay Xisbiga u hayeen si waafaqsan Xeerka, waxa awood u leh soo buuxinta Xubinta banaanata Golaha Dhexe ee Xisbiga iyada oo Cod haldheeri ah ku Dooranayaan Musharixiinta u tartamaya Jagada/Jagooyinka Banaanaaday
2. Xubinta Cusub ee buuxisa Xilka Banaanaday waxaa ay Xilka haynaysaa inta laga gaarayo Shirwaynaha Xisbiga ee caadiga ah

QODOBKA 47AAD

DOCUMENTIYADA SIYAASADEED EE UU XISBIGU SOO SAARO.

a. Documentiyada Siyaasadeed oo uu Xisbiga soo saaro waxaa lagu cadeeynayaa Taariikh, Barotokool iyoTixraac.
b. Documentiyada Siyaasadeed ee Xisbiga uu leeyahay waxaa lagu cadeynayaa goobta iyo cida soo saartay.
c. Documentiyada Siyaasadeed ee Xisbigu waa in ay lahaadaan Ogeysiin iyo Saxiixa Gudoomiyaha iyo Xoghayaha Guud ee Xisbiga
d. Documentiyada Siyaasaded uu soo saarayo waxey yeelan doonaan habraac iyo xeerar hagaya.
e. Documentiyada Xisbigu waxey noqonayan macluumadka uu Xisbiga soo saarayo oo la diiwan geliyey sida,

1. Dastuurka Xisbiga
2. Xeer Hoosaadyada Xisbiga
3. Miisaaniyad Sanadeedka Xisbiga
4. Xisaabxir Sanadeedka Xisbiga
5. Maxdar Qoraalka Shirweynaha Xisbiga
6. Maxdar Qoraalka Kulanka Golaha Sharci Dajinta
7. Madal Siyaasadeed
8. Aragtida Siyaasiyaasadeed
9. Habdhaqanka Xubnaha Xisbiga

Documentiyada Siyaasadeed ee Xisbigu soo saaro ee la xiriira hishiisyada uu Xisbigu la galo cid ka baxsan Xisbiga waxaa ansixinaya Gudiga Fuinta Xisbiga 3/2meel markey isku raacaan Xubnaha Gudiga Fulinta Xisbiga

CUTUBKA TODOBAAD

QODOBKA 48AAD

HABRAACA WAX KA BADELKA MAGACA IYO DASTUURKA XISBIGA

a. Wax ka Badalida Ama Ku darida maagaca iyo Dastuurka Xisbiga waxaa Soo Jeedin Kara Gudoomiyaha Xisbiga
b. Sidoo kale waxaa soo jeedin kara 5 xubnood oo ka mid ah Gudiga Fulinta
c. Sidaas silamid ah waxaa wax ka badili ama ku daris Dastuurka Xisbiga waxaa soo jeedin kara 30 Xubnood oo ka mid ah Golaha Xisbiga
d. Wax ka badalida ama ku darida Magaca iyo Dastuurka xisbiga waxay Ansax noqoneysaa Shirweynaha Xisbiga 50%1 tirada Shirweynaha

QODOBKA 49AAD

HABRAACA KU BIIRIDA XISBI KALE AMA LA MIDOW XISBIYO KALE

a) Xisbiga Midnimadda iyo Cadaaladda Tiir wuxuu ku biiri karaa Xisbi siyaasadeed

b) Sidoo kale wuxuu isbaheysi la gali karaa Xisbiyo kale
c) Marka ay timaado dhaqaalo xumo Xisbiga soo wajahda, Xisbiga oo waaya xubno ku filan IWM
d) Marka Xisbigu ku biirayo Xisbi kale ama uu la Midowayo Xisbiyo Siyaasadeed waa in ay isku raacaan 3/2 Xubnaha Gudiga Fulinta Xisbiga
e) Sidoo kale waxaa soo jeedinkara Gudoomiyaha Gudiga Fulinta ama kala bar Xubnaha Gudiga Fulinta iyadoo si kama dambeys ah loo horgeynayo Shirweynaha Xisbiga caadiga ah ama mid aan caadi aheyn

QODOBKA 50AAD

1. HABKA XALINTA QILAAFAADKA XISBIGA GUDAHIISA

Xisbiga wuxuu yeelanaa Gudi u qabilsan Xalinta Qilaafaatka ee Xisbiga gudihisisa

a. Gudiga Xalinta Qilaafaadka wuxuu ka koobanyahay 9 Xubnood
b. Sidoo Kale gudiga heer Gobolna waxaa uu ka koobnyahay 5 Xubnod
c. Gudiyada Xalinta Qilaafaadka ee heer Qaran waxaa soo xulaya Gudoomiyaha Xisbiga waxaana ansixinaya Gudiga Fulinta Xisbiga
d. wixi qilaafad ah ee uu maareyn waayo ama xalin waayo gudiga waxaa loo gudbniaa racfaan her qaran

2. SIFOOYINKA IYO SHURUUDAHA XULISTA GUDIGA XALINA QILAAFAADKA

a) Waa in ay ahaadaan Dad Qibrad iyo Aqoon u leh Xalinta Qilaafaadka
b) Sidoo kale in ay ahaadaan Dad Sumcad Iyo Sharaf Bulshada ku dhex Leh.
c) Ay noqdaan kuwa wax ku xalila sida ay qabto Shareecada Islaamka

3. SHURUUDAHA XIL KA QAADISTA XUBIN KAMID AH GUDIYADA XALINTA QILAAFAADKA

a) Hadii ay ku cadaato Xubin ka mid ah Gudiyada Xalinta Qilaafaadka Xisbiga Cadaalad daro, Musuq maasuq iyo Eex Xilka Xubinimada Gudiga waa laga qaadayaa
b) Sidoo kale wuxuu mamnuuc ka noqonayaa in uu xil ka qabto Xisbiga dhexdiisa
c) Xubnaha Xisbigu waa in ay helaan Cadaalad isdifaacaan qareen qabsadaan Iyagoon cidna Ka baqeenin
d) Xubinta Xisbiga lama cabsi galin karo inta Dacwadiisa socoto iyo ka diba

4. ANSIXINTA GUDIGA QILAAFAADKA

Gudiyada xalinta qilaafaadka ee heer Qaran marka uu soo xulo Gudoomiyaha waxaa anisixinaaya Gudiga Fulinta Xisbiga

QODOBKA 51AAD

HIR GELINTA QIYAMKA DADKA SOOMAALIYEED IYO MABAADII'DA MAAMUL WANAAG

Xisbiga Midnimadda & Cadaaladda "TIIR" Si uu u hirgeliyo muhiimadaha, qiyamka Dadka Soomaaliyeed mabaadi'da Maamul wanaag ee lagu tilmaamay Dastuulka Qaranka wuxuu Maamulkiisa gaarsiinayaan heer Gobol Degmo Tuulo Deegaan ilaa ay ka soo gaaraan heer Qaran iyagoo u madax banaan xubnaha xisbigu Maamulkooda hoose.

QODOBKA 52AAD
DOORKA HAWEYNKA IYO DADKA LAGA TIRADA BADANYAHAY

a. Si Xisbigu u ilaaliyo xuquuqda iyo ku dhaqanka Dimuqraadiyada loona hubiyo ka qeyb galinta Haweenka iyo Dadka laga Tirada Badanyahey wuxuu Qoondo ahaan u siinayaa Haweenka 30% Xilalka Xisbiga dhexdiisa ah.
b. Sidaas si Lamid ah Xisbigu wuxuu Qoondo ahaan Siinayaa Dadka Laga Tirada Badanyahey 20% Xilalka Xisbiga dhexdiisa iyo Musharaxiinta Xisbigu Sharaxayo.
c. Sidoo kale wuxuu Xisbigu ilaalinayaa Qoondada Haweynka iyo Dadka laga tirada badanyahay marka ay timaado Magacaabis Xil xisbiga dhexdiisa ah ama Musharax Kursi Xildhibaan.
d. Haweenka iyo Dadka laga tirada badanyahey Xisbigu wuxuu siinayaa dhiirigelin iyo Wacyi gelin la xiriirta ka mid noqoshada Xubnaha Xisbiga si waafaqsan Xeerka Xisbiga.

CUTUBKA SIDEEDAAD
QODOBKA 53AAD
GUDDIGA ANSHAXA

Golaha dhexe ee xisbiga ayaa dooranaya Guddi nidaamiya Anshaxa xubnaha Xisbiga kaas oo ah mid heer Dhexe iyo heer Gobolba.

Guddigaasi waxaa uu xilsaaranyahay dib u eegista la xiriirta duridda lagu sameeyay Ciqaabta Anshax iyo hanaanka Edbinta, waxaana lagu Dooranayaa Guddigaas kal fadhiga u horeeya ee uu yeesho Golaha Dhexe ee Xisbiga, waxaana lagu Magacaabi doonaa Guddi Anshax oo ka kooban 9 Qof oo heer Dhexe.

Sidoo kale Gobol walba waxa uu yeelanayaa Guddi Anshax oo ka kooban 7 Xubnood oo ay sameeyaan Guddiyada heerka Gobol.

QODOBKA 54AAD
FALALKA IYO HABRAACA ANSHAX MARINTA

a) FALALKA ASHAXA MUDAN

1. Xubinta iney ku xad gudubto ama jabiso bayaanka ama Dastuurka Xisbiga
2. Inuu ku qowlo ama ku dhaqaaqo ficil keeni kara ama ku keeni kara Gudaha Xisbiga is ku dhaq Buuq, Caay, Ixtiraam dari iyo is Naceyb

3. In xubinta fulin weyso ama u hogaan samiweyso, ama diidmo Amar Sharci ah oo kaga yimid Saraarkisa Sarre, Xafiis, Garab ama Laan ka mida Xisbiga
4. Inuu la yimaado misena ku kaco falal lidi ku ah Mabaad'da iyo Xeerarka Xisbiga , sida Daacadnimo darro, wax isdaba marin iyo Musuqmaasuq
5. In uu si kas ah oo isugu xigxigta uga maqnaado kulamada iyo Fadhiyada kala duwan ee Xisbiga , bilaa Cudar daar.
6. Inuu ku dhaqaaqo waxyaabo lidi ku ah ama kasoo horjeeda Mabaadi'a iyo ujeedoyinka Xisbiga
7. Inuu ku dhaqaaqo Amar diido xili lagu guda jirro Shir ama Howl Shaqo.
8. Inuu ku dhaqaaqo ama uu kulug yeesho wax yaabo ku keeni karo Xubnaha Xisbiga dhexdooda kala did, Faquuq iyo Cuqdad , ama waxyeelo lidi ku ah nabad ku wada Noolashada Xubnaha Xisbiga dhexdooda , waxyeeleyn kara guud ahaan xasiloonida Xisbiga, Jabin kara Sharciyada Xisbiga, ama car qalad iyo waxyeelo baa'ba ah ku keeni kara Jiritaanka Xisbiga.
9. Inuu ku dhaqaaqo fafal awood sheegasho barbaryaac keeni kara ama muran keeni karo oo Tafaraaruq ku keeni kara Xisbiga dhexdiisa, ama inuu abuuro garab ama Xisbi kale oo aan waafaqsanen Shuruucda iyo Dastuurka Xisbiga.
10. Inuu sameeyo ama Abaabulo Kooxeysi gaar ah oo qarsoodi iyo mid muuqdaba ah oo Sharci daro ku saleysana ama aan Sharciyeysnen
11. inuu qaban qaabiyo, hayo, tababaro, u diyaariyo ama dhiiri galiyo Urur ama Qalabeeyo koox ama Xubno Xisbiga ka tirsan ujeeda ah in loo adeegsado rabshadi ama qalalaaso cabsi galin iyo Nabad xumo abuur ah.
12. In Maxkamad Dacwo ku goobeyso oo ku saabsan qilaaf ama arin qalalaaso abuurid , rabshado, ama arrin kasta oo ku saabsan xuquuqda, waajibaadka iyo waajibaadka xubin kasta oo ka mid ah Xisbiga iyada oo aan marka hore laftiisa laga helin waxqabadyada ay bixiso Xisbiga ee Dastuurkan .
13. Inuu ku guul dareysto , diido is difaacid, ama waqti ku dhamaado asoon Racfaan qaadan.

b) HABRAACA ANSHAX MARINTA

Xisbiga waxa uu yeelanayaa habraac loo maro Anshaxmarinta xubin ama sarkaal Xisbiga ka tirsan, Guddiga waxay awood u leeyihiin in aay ka qaadan Xubinta ama Sarkaalka ay ku helaan eed, iyaga oo eegaya culayska Gefka xubintu gashay

Xubin kasto ka tirsan Xisbiga ee ku kaca mid ka mid ah fafalka ku xusan qeybta sarre qodobka43 ee Dastuurkan waxaa waajib ah in lagu qaado ama la mariyo ganaaxyada ama ciqaabyahan soo socda.

SHURUUDHA KALA DUWAN EE ANSHAX MARINTA

a) Cambaareyn

b) Canaan
c) Ganaax
d) Ka joojin Xubinnimo iyo ganaax
e) Ka qaadida xafiiska iyo Maamulkisa
f) Ceyrin laga ceyriyo Xisbiga
g) Xubintii Gudi Anshax heer Gobol Xukunto ee ku qanci waydaa waxaa ay u Rafcaan qaadan kartaa Guddiga Anshaxa heer Qaran

QODOBKA 55AAD

A) **MAAREYNTA**

1. Hadii xubin ka mida Xisbiga la dulmiyo ama murugo iyo gardaro cadd, waa inuu u gudbiya cabashadiisa Maamulka ama Masuul Sarre ee Xisbiga katirsan ee u dhow oo wax ka qaban kara Cabashada Dhibanaha/Dulmanaha.
2. hadii ruuxa cabanaya ama dulman ku qanci waayo wax ka qabashada Dacwadiisa Masuulka ama Maamulka uu u gudbiyey, waa inuu ka qaata Racfan uuna u gud biyaa Maamulka ku xiga ee ka sareeya kii hore uu u gudbiyey Dacwadiisa si nidamka wafaqsan.
3. Dhammaan Rafcaannada waa in la xaliyaa waqtigooda, si taxadar leh, marxalad ama dhacdo kasta oo aan ka dambeyn 3 Todobaad ka dib marka la soo gudbiyo Racfaanka.
4. Guddiga Fulinta Qaranka ee Xisbiga ayaa noqon doona ugu dambeyntii haddii uu ku guuldareysto, diidmo ama dayac daro si loo daaweeyo warbixinta, codsiga, cabashooyinka ama Rafcaanka qaybta ka midka ah go'aanka, wuxuu noqonayaa dembi laftiisa Dastuurka ku qoran.

B) **RACFAAN**

1. Xubin kasta oo ka tirsan Xisbiga oo ku qanci waaya ama dhibsada go'aan lasoo saaray oo soo horjeeda ayna soo saartey mid ka mid ah Hay'adaha ama Sarkaalkisha Xisbiga wuxuu xaq u leeyahay in uu Racfaan u qaato Xafiisyada ka sareeya ee Xisbiga muddo Afar iyo Toban Maalmood gudohood ah go'aanka.
2. Rafcaanku wuxuu go'aan ka gaarayaa Hay'adda Rafcaanka ee ku habboon muddo labaatan iyo kow Maalmood laga bilaabo Taariikhda helitaanka Ogeysiiska Rafcaanka ee Guddiga Fulinta ee ku habboon.

CUTUBKA SAGAALAAD
QODOBKA 56AAD

HEER GOBOL IYO DEGMO

Xisbigu waxa uu yeelanayaa Golayaal heer Gobol oo ka kooban Todobo iyo labaatan xubnood, gudidaasi waxay yeelanaysaa Gudoomiye iyo Gudoomiye xigeen, Xoghaye iyo xubnaha kale oo ka midnoqonaya hawl wadeenada Xisbiga.

Waxa uu sidoo kale yeelanayaa Golayaal heer Degmo oo ka kooban Shan iyo Toban xubnood oo yeelanaya Gugudoomiye, Gudoomiye xigeen iyo Xoghaye iyo xubnaha kale oo noqonaaya hawl wadeenada Xisbiga ee Degmada.

Waxaa lagu nidaaminayaa xilalka iyo howsha Golayaasha Xisbiga ee Heer Gobol iyo Heer Degmo, xeer-hoosaad nidaaminaya qaab-dhismoodkooda iyo shaqooyinkooda oo ay soo saarayaan Golaha Dhexe ee Xibiga.

QODOBKA 57AAD

LAAMAHA DIBADDA EE XISBIGA

Xisbiga waxa uu yeelanayaa laanta Xisbiga ee Dibadda, laamaha Xisbiga ee Dibadda waxay lahaanayaan hab-dhismeed u gaar ah oo lagu soo saaro xeer-hoosaad.
Qaab-dhismeedka Laamaha Dibadda waxaa Magacaabaya Guddoomiyaha Xisbiga markuu la tashado Golaha Fulinta, waxaana Ansixinaya Golaha Dhexe ee Xisbiga.

CUTUBKA SAGAALAAD

QODOBKA 58AAD

XEERARKA GUUD

HABRAACA WAXKABEDELKA IYO KAABISTA XEERKA XISBIGA

1. Awoodda wax ka bedelka ama kaabista Xeerka Xisbiga waxaa iska leh Shiweynaha Guud ee Xisbiga, waxaana ansxinaya isla Shirweynaha Guud.
2. Waxaa soo jeedin kara Guddoonka Xisbiga ama Golaha Dhexe ee Xisbiga Afar meelood hal meel ee Golaha Dhexe ama 1/3 Sadex dalool hal dalool oo Golaha Guud (Shirweynaha Guud).
3. Wax ka bedelka Xeerka Xisbiga waxaa lagu ansixin karaa aqlabiyadd ah 2/3 ee Shirweynaha Guud.

QODOBKA 59AAD

BAABI'INTA XISBIGA AMA MID KA MID AH LAAMIHIISA

a) Xisbiga Midnimadda Iyo Cadaaladda Waala baabi'inayaa haddii uu ku guuldareysto sifaha Xisbinimo ee uu u taaganyahay
b) Haddii Xisbigu baaba'o isagoo talada Dalka haya Hantida Xisbigu waxay noqonaysaa Hanti Qaran
c) Xisbiga Midnimadda iyo Cadaaladda hadii baa'ba' ku yimaado isagoon talada Dalka heynin Sababtuna ay tahey qilaaf aan dhamaad laheyn oo Xisbiga dhexdiisa ah Hantida Xisbiga waxaa lagu wareejinayaa Xisbiyada kale ee ay Xisbiga Bahwadaagta yihiin

QODOBKA 60AAD

FASIRAADA XEERKA XISBIGA

Fasiraada Qodobada xeerka Xisbiga waxaa u xilsaaran ama leh Golaha Dhexe ee Xisbiga, haddii ay u baahdaan waxay la kaashan karaan Khubaro Sharci.

QODOBKA 61AAD

XEER-HOOSAAD

Golaha dhexe waxa uu soo saari karaa xeer hoosaadyo aan ka horimanayn Xeerka Xisbiga.

QODOBKA 62AAD

DHAQANGALKA XEERKA

Xeerkanai waxa uu dhaqan gelayaa marka uu ansixiyo Shirwaynaha Xisbigu.

(DHAMAAD DHAMAAD DHAMAAD)